


WARBIXINTA BAARITAANKA TB-GA EE SOO HAAJIRAYAASHA



www.tuberculose.nl
The Hague, The Netherlands



Maxaa ballantan laguugu soo sameeyey?

Qaaxada (tb-ga) waa Cuur daran laakiin waa cudur la daaweyn karo oo dunida aad ugu badan. Sidoo kale waddanka aad ka timid. Sidaa awgeed ayaa markaad Nederlaan/Holand imaado lagaaga baarayaa qaaxada. Baaritaanka koowaad waa mid waajib ah sida uu dhigaayo Sharciga ajaanibka.

Qaaxada waa xanuun si tartiib ah u sii fidaaya. Sidaa darteed ayaa waxaa dhici karta in dhowr jeer laguugu yeero baaritaano isku xiga jooga. Taasi waxey ku xiran tahay sida ay qaaxada ugu badan tahay waddanka aad ka timid.

Waxaa kula soo socodsiinaaya Waaxda la dagaalanka tb-ga ee GGD haddii aad u baahan yahay baaritaano kale iyo waqtiga lagu sugaayo. Ka qeyb qaadashada baaritaanka waa muhiim, waana caafimaadkaaga iyo kuwa dadka agagaarkaaga.



Muxuu yahay qaaxada?

Qaaxada (tb-ga) waa xanuun ay bakteeriyo sababto. Waxaa xanuunkan uu aalaa ku dhacaa sambabada. Qofka qaba qaaxada sambabada wuxuu xanuunkan qaadiin karaa dadka kale, isagoo ugu gudbinayo hawada. Calaamadaha qaaxada lagu garan karaa waxaa ka mid ah qufaca, culeyskaaga oo yaraada, qandho iyo habeenkii aad dhidido. Mar mar dadka wax xanuuno ma qabtaan amaba xanuuku wuu yar yahay. Waxaad suuragal in aad qaaxada qabto, balse aadan adiga dereemin. Sidaa darteed ayaa baaritaanka tb-ga muhiim u yahay. Sidoo kale dadka agagaarkaaga, maxaa yeelay dadka kale waad qaadiin kartaa adigoo aadan ogeyn.

Warbixin dheeraad ah ma u baahan tahay? Waxaad soo Download ku sameyn kartaa qoraalka "Wat is tuberculose? waxaad ka heleysaa www.tuberculose.nl ama weydii Waaxda la dagaalanka tb-ga ee GGD.

Maxaad u baahan tahay inaad ka ogaato sawirka ex-rayga (sawirka feeraha)?

Maadaama qaaxada leys qaadsiiyo uu yahay midka sambabada waxaa badiya sawirka ex-rayga laga qaadaa (sawir sambabka) Baaritaanka ma aha mid qatar ah, xitaa uma aha qatar ilmaha yar yar ama naagaha uurka leh.

Maxaad sameyneysaa intaan sawirka sambabka la qaadin?

- Waxyaalaha (katiinada, jijimanka, ama wixii kale) inaad iska furto.

- Timaha dheer waa inaad kor u xirtaa masarka/xijaabka looma baahna inaad iska furto.
- Badiyaa waxaa sawirka la qaadaa qeybta jirka kore oo qaawan.

Maxaad sameyneysaa marka la qaadaayo sawirka sambabka?

- Waxaa lagu leeyahay inaad si xoog ah u neefsato, iyo inaad neeftaada ku celiso marka sarka la qaadaayo.
- Haddii ilmahaaga sawirka laga qaadaayo, waxaad ka arkeysaa ilmahaaga miraayada dhexdeeda. Ilmahaaga niyada u deji marka sambabka la qaadaayo sawirka xanuun ma aha, waana waqti aad u gaaban.

Maxaa marka ka dib dhacaaya?

- Waxaa sawirka sambabka fiirinaaya dhaqtarka la dagaalanka tb-ga ee GGD.
- Waaxda la dagaalanka tb-ga waxey dirayaan cadeyn ah in lagaa baaray qaaxada Waaxda Immigreshanka (IND) 9keliya baaritaanka koowaad). Mar mar ayey GGD waxay ku siineysaa cadeyntan. Markaasi adiga ayaa u diraaya IND. Natijada baaritaanka marnaba looma gudbinaayo IND.
- Haddii sawirka sambabkaaga aan wax gaar ah laga arkin, markaasi wax fariin ah laguuma soo diraayo.
- waxaa fariin laguugu soo diraayaa haddii sawirka sambabka uu ka cadaado in baaritaan dheeraad loo baahan yahay. Taasi micnaheeda ma aha inaad qaaxo qabto. Haddii sawirka waxa ka muuqda waxaa sababi kara waxyaalo kale. Laakiin baaritaan dheeraad waa loo baahan yahay, taasoo adiga dan kuu ah.

Sidaa darteed waa muhiim inaad timaado marka ay GGD dib kuu ballamiyaan.

- Haddii aad qaaxo qabto, sida ugu dhaqsaha badan ayaa lagu daaweynaayaa. Qaaxada iyo daaweynteeda sabab uma noqon karaan in sharciga deganaanshaha laguugu diido. Daaweyntana guud ahaan Nederland waad ku dhameysan kartaa.
- Haddii qaaxo ama xanuun kale lagaa helo, waxaa dhaqtarkaaga uu fariin ka helayaa dhaqtarka tb-ga ee GGD.

Ugu dambeyn

- Sawirka sambabka waa wax markaasi keliya la qaadaayo. Haddii marka ka dib aad xanuun dareento calaamadaha qaaxada ah (sida qufaca, culeyska oo yaraada, qandho ama habeenkii aad dhidido)? Markaasi aad dhaqtarkaaga qoyska, xitaa haddii muddo dhowr ka hor baaritaan laguugu sameeyey. Ama la xariir waaxda la dagaalanka tb-ga ee GGD.
- Ma kula tahay in si qaldan ama aan taxadir lahayn laguula dhaqmay? Waxaa GGD ay kuu suura gelineysaa inaad ashtako gudbiso. Waxaad website-ka GGD ka heleysaa warbixin dheeraad, ama waxaad la xariir kartaa waaxda la dagaalanka tb-ga. Ka fiiri halkan hoose cinwaanka GGD Warbixinta GGD.